# Nidaamka Qaran ee Gudbinta

Hagaha Loogu Talagalay Waalidka

© The Children's Society 2020

The Children's Society

## Waa maxay NRM?

NRM ama 'National Referral Mechanism' ('Nidaamka Qaran ee Gudbinta') waa qaab-dhismeed lagu ogaado dhibanayaasha la kulmay ka ganacsiga dadka iyo Addoonsiga Casriga ah.

Iyadoo loo marayo hannaankan waa in la xaqiijiyaa in dhibanayaasha ay helaan caawimaad iyo in waayo-aragnimadoo la aqoonsado.

## Waa maxay ka ganacsiga dadka?

Ilamaha waa in loo aqoonsadaa in uu yahay dhibane la kulmay ka ganacsiga dadka haddii labadan sheey ee soo socda ay dhaceen:

**1.**

Ilmaha waa **la qortay** (tusaale ahaan iyadoo loo balanqaadayo lacag, hadiyado, heer bulsho iyo/ama in la lasiinayo dareen inuu meek ka tirsan yahay iyo aqoonsasho – taasi waxaan ogu yeernaa '**xadgudub**')

AMA

ilmaha waxaa laga **safriyay** goob A waxaana la geeyay goob B (tani waxeey noqon kartaa masaafo dheer ama kuwa gaaban, oo eey kujiraan isla tuulada, magaalada ama caasimada)

AMA

ilamaha waa waa **la qariyay**. Qarinta waxaa laga wadaa xajinta iyo qarsashada qof, tusaale beer dhexdeeda si loogu shaqeeyo, ama guri gun dhig u ah ka ganacsiga daroogada (badanaa loo yaqaano 'dabin guri').

**2.**

Tani waxaa loo sameeyay **ujeedado ah in tacaddi loo geysto.**

Marka tusaale ahaan, qof da'yar ayaa meel tareen laga raaciyay si uu meel kale ugu qaado oo uu u geeyo daroogo. Tani waxaan ugu wacnaa **tacaddi dambi.**

Tusaale kale waxa kamid noqon kara akoonka bangi ee qof da'yar oo loo isticmaalo in lagu keeydiyo lacag lagu helay si sharci darro ah. Tani waxaan ugu wacnaa **tacaddi dhaqaale.**

Tusaalaha **dhiig-miirashada shaqaalaha** waxaa kamid ah qof da'yar oo "lagu shaqeeyo' iyada oo aan wax lacag ah la siineeynin.

Ama **dacadi galmo** loo geysto iyaga oo lagu qasbayo inay la galmoodan hal qof ama dad badan.

© The Children's Society 2020

**Sida dacaddiga ilmaha, ka ganacsiga dadka iyo Addoonsiga Casriga ah waxay ku lug leedahay awooda aan simeyn ee u dhaxeeyo dhalinta iyo kuwa ayaga xakameeyo (tusaale ahaan da'da ama heer darajo aawadeed).**

Hadii ilamaha loola dhaqmo sida in uu qof 'leeyahay' (hanti camal) ama hadii shaqo lagu qabto oo aysan awoodin inay ka soo tagaan markaasi tani waxaa lagu magacaabaa Addoonsiga Casriga ah.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in ilmo kasta oo ka soo jeeda asal kasto loo geysan karo tacaddi. Ceeb malahan tan, sikastaba muhiimadu waxay tahay in la arko calaamadaha lagana warbixiyo si loo hubiyo in canugga uu helo caawimaada saxda ah. NRM ma aha beddelka hababka ilaalinta caadiga ah, balse hannaanka NRM waa inuu kaabaa kuwaan. Sidaa darteed wargelinta walaacyada booliska iyo adeegyada bulshada ee deegaankaaga weli waa muhiim.

## Hanaanka gudbinta ee NRM

Waalidiintu iskood uma samayn karaan gudbinta NRM, balse ururada qaarkood sida booliska iyo kuwa daryeela bulshada ayaa u xil saaran inay u gudbiyaan Xafiiska Arimaha Gudaha haddii ay ka shakiyaan inuu qof dhibane u yahay ka ganacsiga dadka. Xirfadlayaasha ku shaqada leh gudbinta waxaa loogu yeeraa **falceliyaasha koowaad.**

- Haddii calaamadaha tahriibinta (sidoo kale loo yaqaano tilmaamayaasha) ay jiraan, tani waa inay ku filnaataa falceliyaasha koowaad inay u gudbiyaan Xafiiska Arrimaha Gudaha.

- Xafiiska Arimaha Gudaha ayaa markaa go'aan ka gaari doona in qofkaas loo aqoonsado inuu yahay dhibane tahriibin.

- Qaar ka mid ah samafalayaasha ayaa sidoo kale sameyn kara gudbinta NRM waxayna ku siin karaan talo. Tusaale ahaan waxaad wici kartaa khadka caawimaada ee NSPCC ama khadka caawimaad ee Addoonsiga Cariga ah si laguu caawiyo.

## Maxaa laga wadaa go'aanka NRM?

Hannaanka go'aan qaadashada wuxuu leeyahay laba talaabo:

1. **Go'aan Sababo Macquul ah** leh waa in lagu gaaro shan maalmood gudahood. Tani waxeey dhigan tahay **'Waan ka shakisanahay balse ma xaqiijin karo**', inay yihiin dhibane.

© The Children's Society 2020

2. Go'aankan kadib, **go'aan Xaqiijin Kama Dambays ah** waa in la sameeyaa. Tani macnaheedu waa " **Waxay u badan tahay'** inay yihiin dhibbane.

Macluumaad dheeraad ah ayaa loo diri karaa Xafiiska Arimaha Gudaha ilaa ay ka gaarayaan Go'aankooda xaqiijinta kama dambeysta ah. Macluumaad kasta oo cusub oo habboon ayaa ka caawin doona go'aankooda. Iyada oo waalidiintu aysan sameyn karin gudbin NRM, waxaad diri kartaa macluumaad cusub gudbinta ka dib. Waxaan ku dhiiri galin lahayn in tan la sameeyo iyada oo lala kaashanayo qofka ama hay'ada markii horaba gudbinta sameeysay, hadii ay suurta gal tahay. Macluumaadka cusub waa in lagu diraa nationalreferralmechanism@homeoffice.gov.uk

Haddii qof loo aqoonsado inuu yahay dhibane tahriib, tani waa inay saameyn ku yeelataa sida loola dhaqmo haddii la xiro ama uu wajaho eedeymo dambi uu galay, sababtoo ah qofka da'da yar tacaddi ayaa loo geystay. Xaaladdan oo kale dhibbanayaasha tahriibinta sidoo kale waxay xaq u leeyihiin inay adeegsadaan difaac sharci oo loo yaqaano Difaaca Addoonsiga Casriga ah waana inay tan kala hadlaan qareenkooda.

Hadii ilmaha uu ka helo Xafiiska Arimaha Gudaha go'aanka xaqiijinta kama dambeysta ah oo wanaagsan markaas waa in
la siiyo wado lagu caawiyo, sida daaweynta, si looga caawiyo inay ka soo kabsadaan dhibaatooyinkooda.
Taageeradan waa inay bixiyaan kuwa u adeego bulshada go'aanka NRM-na waa inuu kamid ahaadaa sameenta qorshahooda ilaalinta. Waalid ahaan waxaad u isticmaali kartaa go'aanka wanaagsan inaad kaga raadsato taageero adeegyada bulshada. Ilmahaagu waxuu sidoo kale taageero ka heli karaa Adeegga Ilaalinta Sharciga ah ee Madaxabanaaan ee Ka Ganacsiga Carruurta.

Haddii ilmahaagu magangalyo ama badqab ka dalbanayo UK markaa go'aanka NRM ayaa ku habboonaan karo midan. Xaaladaha qaarkood go’aanka NRM ee wanaagsan ayaa u horseedi kara Xafiiska Arimaha Gudaha inuu siiyo ilmahaaga ikhtiyaar ah ah inuu ku sii noolaado UK. Waa muhiim inaad wargaliso qareenka socdaalka cunuggaaga xilli horebo, sida ku habboon inta aan NRM la gudbin. Waxay ku siin karaan talo ku saabsan NRM iyo xiriirka ay la leedahay codsiga nabadgelyada ilmahaaga.

## Kawaran haddii aad ku faraxsaneeyn go'aanka NRM?

Adiga ama canuggaaga waxaad xaq u leedihiin inaad codsataan go'aanka NRM inuu dib uga fiirsado Xafiiska Arrimaha Gudaha haddii aadan ku faraxsaneeyn. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay matalaad sharciyeed si aad uga hortagto go'aanka taninna waxay u baahan doontaa inuu sameeyo garyaqaan Sharciga Dadweynaha (caawimaad sharci ayaa loo heli karaa arintan iyadoo kuxiran duruufahaaga). Waxaad ka heli kartaa garyaqaan Sharci Dadweeyne halkan.

The Children's Society

## Halka laga heli karo caawimaad

Si aad caawimaad u hesho ama aad ugala hadasho wixii walaac ah ee aad qabtid waxaad wici kartaa Khadka Caawinta Addoonsiga Casriga ah ee 0800 012 1700 ama khadka caawinta NSPCC ee 0808 800 5000.

Haddii ilmahaaga uusan rabin inuu kaala hadlo xaaladdiisa, ama xitaa haddii uu kaala hadlo, ha ogaado inuu had iyo jeer soo wici karo Khadka caawinta carruurta ee 0800 1111 ama uu kula sheekeeysan karo khadka tooska ah, iyadoo la isticmaalayo faahfaahinta lagu bixiyay halkan. Meelaha qaarkood ee UK kamid ah carruurtu waxay heli karaan taageerada Adeegga Ilaalinta Sharciga ah ee Madaxabanaaan ee Ka Ganacsiga Carruurta. Si aad u ogaato in cunuggaaga heli karo caawimaadaan waxaad ka wici kartaa khadka caawimaad 24-ta saac ee Barnardo 080004303.

**Haddii aad ka walwalsan tahay in ilmahaagu khatar ugu jiro waxyeello, fadlan ka wac booliska 101 ama 999 markay jirto xaalad degdeg ah una sharax inaad ka walaacsan tahay in ilmahaaga la tahriibiyo.**

Sidoo kale waxaan kugu baraarujineeynaa inaad wacdo kooxda daryeelka bulshada ee deegaankaaga- faahfaahinno ayaa laga heli karaa bogga intarnetka ee golaha deegaankaaga. Waxaad ka heli kartaa shabakada golaha deegaankaaga halkan.

© The Children's Society 2020